


Sidan ayaa adiga iyo kooxdaada shaqo u habayn kartaan booqasho amaan ah



Dadka oo dhan mas'uuliyad ayaa ka saaran in la joojiyo faafinta cudurka

Dadka degan hoyga waayeelka waxay iminka keligood dooran karaan haddii ay doonayaan in la soo booqdo iyo in kale. Si loo joojiyo in cudur soo galo gudaha oo ku faafo hoygan waxaa ina saaran mas'uuliyad wadajir ah in aynu raacno talooyinka jira – adigaaga ah shaqaale, dadka degan hoyga iyo soo booqdayaasha.



Muhiim ah in laga shaqeeyo dhanka nidaamyada maxaliga ah

Qofka mas'uulka ka ah hawshan ayaa diyaarinaya nidaamayda maxa-liga ah si loo xadeeyo in cudur faafo wakhtiga booqasho. Shaqaale ahaan waxa adigu aad u baahantahay inaad ogaatoo oo awoodo isticmaalka nidaamyada dhanka shaqada waaqiciga ah.

Talo! Si wadajir ah kooxdaada shaqo uga wada sheekaysta nidaamy-ada hoygan iyo qaabka shaqo. Maamulka arrimaha bulshada liista-deeda hubinta *“Ordna för säkra besök på äldreboenden”* markaasi caawimaad ahaan karta.



Taageer dadka degan hoygan

Shaqale ahaan waxaad u baahan kartaa inaad wargeliso dadka de-gan hoygan sida ay isaga ilaalin karaan in cudur ku faafo wakhtiga la soo booqanayo, tusaale ahaan in aanay la kulmin dad badan oo kala duwan wakhti isku mid ah oo ay ka durkaan masaafo fiican jir ahaan. Laakiin waxaa muhiim ah in la xusuus-naado in iyaga ay yihiin kuwa dooranay dadka ay doonayaan inay soo booqdaan iyo intay leegtahay u dhawaanshaha ay doonayaan inay jirsadaan soo booqdaha.

Sii wad inaad fududeyso xiriirka u dhaxeeya qaraabada ee ka dhacaya banaanka ama dhinaca telafoonka iyo wada hadal fiidyow ah ee loogu talagalay kuwa sidaas doonaya.